


BADBAADDADA KOOMBUYUUTARKA:

Waa Hawl Qof Walba u Taal


Koombuyuutaradda iyo internetku waxay bartilmaameed caan ah u yihiin dambiilayaasha. Haddii aan laga ilaalin, tuugtu waxay soo weerari karaan koombuyuutarkaaga waxaanay xadi karaan lambaradda kiridhit kaadhka (credit card), xogta xisaabta bangiga, iyo xogtaada kale ee kuu gaarka ah.

Dhamaan dadka isticmaala koombuyuutarka waa inay qaadaan talaabooyin lagu kordhinayo amniga laguna yaraynayo fursadda adiga iyo koombuyuutarkaaga waxyeelo ku soo gaadhi karto. Hababka soo socda ayaa ka mid ah siyaabaha loo sugi karo amniga koombuyuutarkaaga.



Fayraska & Gooryaanka


“Fayraska” koombuyuutarku wuxuu raaca barnaamijyadda ku jira koombuyuutarkaaga waxaanu dhibaato ku keenaa barnaamijyada, macluumaadka ama qalabka. “Gooryaanka” koombuyuutarku sidaas oo kale ayuu sameeyaa waxaanu dheer yahay isagoo tarma. Waxyaabahani waxay dhaawici karaan koombuyuutarkaaga waxaanay sidoo kale aafayn karaan koombuyuutaradda kale.



TALLAABO QAADIS:

Furayaasha Sirta ah (passwords)


Furayaasha sirta ah (passwords) waxay ilaaliyaan xogta kuugu kaydsan koombuyuutarkaaga, ee ka midka yihiin xisaabaha gaarka ah, dokumentiyadda, iyo helitaanka xogta aqoonsiga.



Habka ugu wanaagsan ee aad uga ilaalin karto dadka soo weerara koombuyuutaradda (“tuugta koombuyuutaradda”) iyo dadka kaleba inay maleeyaan furahaagu waa adiga oo isku daya inaad isticmaasho isku-jir xarfo, lambaro iyo calaamado (sida !, @, #, \$, %) ah. Waxaa ugu muhiimsan, waligaa baasweedhkaaga qof kale ha u sheegin. Meel badbaadsan ku qoro baasweedhadda isla markaana u bad-badal si joogto ah.

Baajjaka & abdhayt-yadda (Patches & Updates)

Baaj ama abdhayt waa barnaamij koombuyuutar oo yar kaas oo saxa ciladaha barnaamijyada ee la yaqaan. Shirkadda barnaamijyadu waxay soo saaraan baajaj cusub waxayna cusboonaysiinta loo baahan yahay kaaga sheegi doonaan bogagga internetka ama iimayl ahaan haddii aad isku diiwaangalisay shaygooda.



Waxaa muhiim ah inaad ku shubato baajjalkii ugu dambeeyay. Koombuyuutarkaaga ayaad siin kartaa amar ah inuu hawshan iskii u qabto. Wuxuu shirkadaha barnaamijyadda la habsan doonaa inuu saxo nidaamka shaqada obaraytin sistamkaaga (operating system), web borowsarkaaga (web browser), iyo barnaamijyadda lidka ku ah fayraska.

Barnaamijyadda Ka Hortagga Spyware/Fayraska & Faayarwool (firewall)

Faayarwoolku waa sistam shaandhayn ah kaas oo xaniba qulqulka xogta ee u dhaxeeya sistamka koombuyuutaradda isku xidhiidhsan. Waxay ka hortagaan in xogta khaaska ahi ay liigto isla markaana waxay ka hortagaan soo galista barnaamijyadda aan loo baahnayn.



Barnaamijyadda ka hortagga fayrasku, ama barnaamijyada lidka fayraska, waxay isku dayaan inay aqoonsadaan, badhxaan ama ka takhalusaan softiweerradda xunxun. Barnaamijyadani waxay isku dayaan inay “nadiifiyaan” ama


Halkan waxaa ku qoran waxyaabo aad markiiba samayn karto oo aan kaa qaadan waqti badan ama aan kharash badan kugu taagnayn. Qaarkood baa waxay u baahan yihiin inaad uun dabecadahaaga badasho.

“hagaajiyaan” fayraska, “faquuqaan”, ama “burburiyaan”, iyagoo si joogto ah gacanta u marinaya (scanning) koombuyuutarkaaga.

Adigoo adeegsanaya nidaamka (settings) web borowsarkaaga, waxaa kordhin kartaa amniga waxaanad xanibi kartaa xayaysiisyadda soo-boodda.

Faayrwoolo si fudud loo adeegsan karo iyo barnaamijyo lidka fayraska ah oo bilaash ah ayaa la heli karaa. Xogta barnaamijyadan hel adigoo ku baadhaya “Firewall Software” ama “anti-virus programes”

Samaynta Koobiyadda



Koobi ka samaynta faylasha muhiimka ah ama dokumentiyadda koombuyuutaradda waxay muhiim u yihiin sida ay muhiim u tahay in koobiyo dheeri ah aad ka haysato waraaqahaaga dhalashada ama baasaaboorka. Dokumentiyada iyo faylashaada waxaad ku ilaashan kartaa adigoo ku kaydsada cajalad (disk), USB thumb drive, kaydka webka ama qalab kale oo wax kaydineed. Si joogto ah u samee arrintan.

LIISKA HUBINTA

Halkan waxaa ku lifaaqan liiska hubinta ee dadka guryaha ku isticmaala koombuyuutarka si ay u ilaaliyaan koombuyuutarkooda. Wuxuu liiskani ka yimid Xarunta Isu-duwida Kooxda Diyaargarowga Xaaladaha Degdegga ah ee Koombuyuutaradda ee loo yaqaan CERT. Faahfaahinta waxaa laga heli karaa boggan:

www.cert.org/tech_tips/home_networks.html.

- Isticmaal softiweerka lidka fayraska.
- Isticmaal faayarwool.
- Ha furin lifaaqyadda la socda iimayladda aanad garanayn.
- Ha ka shaqaysiin barnaamijyadda aan la garanayn cida leh.
- Fadhiisi ku-darka magaca faylasha.
- Dhammaan barnaamijyada (oo ay uu ku jiro obaraytin sistamku) ha ahaadaan kuwo dambe
- Bakhtii koombuyuutarkaaga ama ka saar xadhiga internetka marka aanad isticmaalayn.

Basaasiinta iyo xayaysiisyada aan la rabin



Qof walba wuxuu doonayaa inuu ilaaliyo khusuusiyaadisa. Nasiib darro, barnaamijka basaasnimada ("spyware") iyo barnaamijyada xayaysiiska ("adware") ay lagu shubi karaa koombuyuutarkaaga iyaddoo adiga aan ogolaansho lagaa helin.

Adiga oo aan ogayn ayaad laftaadu ku shubi kartaa barnaamijyadan koombuyuutarkaaga adigoo booqanaya bogag mucayin ah, gujinaya xidhiidhyo, faylal kala soo baxaya internetka ama furaya lifaaxyo la socda fariimaha iimaylka.


Spyware wuxuu ururiyaa xogta qofka waxaanu u diraa dambiilayaasha. Adware-kuna wuxuu xayaysiis aan loo baahnayn ku soo bandhigaan daaqado soo-booda ama wuxuu shaashaddaada ku sameeystaa layn xayaysiis.

Iimaylka Foosha Xun & Barnaamijyada loogu talogalay in lagu dhaco Lacagtaada

Ha ka jawaabin iimayladda jirrida ah (junk) – masax!
Waxaad kaliya furtaa iimayladda waxaadna gujisaa dadka aad garanayso ee aad ku kalsoon tahay.

"Isbaam (Spam)" waa iimayl jirri ah oo aanad waligaa codsan. Ha ka jawaabin, iska masax uun.

"Fishin (Phishing)" waa budhcad isticmaasha isbaam (spam) ama fariimo soo-booda si lagaaga xado lambarkaaga sooshiyal sikuyuuritiga ama furayaasha sirta (passwords). "Budhcadda koombuyuutaraddu (Phishers)" waxay iimayladooda iyo bogagooda internetka u soo ekaysiiyaan bangi ama hay'ad kale oo sumcad leh. Waxay kugu siraan inaad siiso macluumaadkaaga lambaradda xisaabta iyo furayaasha sirta ah (passwords). Ha u jawaabin ama ha gujin xidhiidhadda ku waydiinaya xogta khaaska ah. Iska masax!



Sidoo kale wixii faahfaahin la xidhiidha amniga waxaadna ka eegtaa: www.seattle.gov/informationsecurity.

Waxaad sidoo kale booqan kartaa Bogga Amniga ee Microsoft oo aad ka helayso xogtii oo ku qoran afaf ama luuqado kala duwan. Halkan ka booqo: <http://www.microsoft.com/protect> waxaanad doorataa luuqadaada adigoo gujinaya "worldwide sites."

HELIDDA CAAWIMADDA

Koobiyo daabacan oo macluumaadkan ah ayaad heli kartaa haddaad wacdo (206) 233-7877 ama aad waraaq noogu soo hagaajiso PO Box 94709, Seattle, WA, 98124-4709.

Maktabadaha dadwaynaha ee maxaliga ah iyo xarumaha tiknoolajiyadda bulshada ayaa sidoo kale ah ilo wanaagsan oo laga heli karo macluumaad dheeri ah. Fiiri : www.seattle.gov/tech/techmap

Waxaa sidoo kale caawimo laga heli karaa shirkadaha taageerada farsamada koombuyuutarka iyo golayaasha internetka. Warbixinada macaamiisha, jaraa'idka koombuyuutarada, tukaanadda koombuyuutarada, sameeyayaasha iyo shirkadaha barnaamijyada ayaa sidoo kale ku siin kara xog faa'iido badan leh.

Qoraalkan kooban waxaa diyaarisay Maamulka Magaalada Seattle, Waaxdeeda Tiknoolajiyadda Xogta Barnaamijkeeda Tiknoolajiyadda Bulshada iyo Xafiiska Amniga Xogta.
www.seattle.gov/tech
www.seattle.gov/informationsecurity


Macluumaadkan waxaa loo bixinayaa si loo bararujiyo waxna loo baro dadwaynaha. Inkastoo aan aad iyo aad iskugu daynay inaan ka dhigno mid sax ah intii macquul ah, haddana ma xaqiijin karno in dhamaan macluumaadku sax yahay sidaas darteed mas'uul kama nihin qalad kasta ama wax kasta oo laga tagay.

Waxaan idinku dhiirigalinaynaa inaad samaysaan cilmi-baadhis gaar ahaaneed oo aad wax waydiisaan aqoonyahanada amniga koombiyuutarka.

Version 01/2010



KOMBUYUUTARKAAGU AMMAAN MA YAHAY?



Tallooyinka
dhawritaanka
koombuyuutarkaaga
iyo ammaankaaga

